## Casharka 10

1. Farriinta ugu muhiimsan ama ugu ahmiyadda weyn leh ee dunida waa tee?
-Waa farriinta Ilaah.

2. Maxaa farriinta Ilaah ka dhigay tan ugu ahmiyadda weyn leh ee dunida?
-Waxaa sabab u ah in dadka oo dhaniba ay beenaaleyaal yihiin.
-in Ilaah keliya uusan been sheegin.
-Iyo in Ilaah keliya uu mar waliba runta sheego.

3. Ka hor billowgii, Waa kuma kan kelidii Noolaa?
-Ilaah.

4. Ilaah bilow ma leeyahay?
-Ilaah bilow ma leh.

5. Miyaa qofi abuuray Ilaah?
-Maya.
-Ilaah waa baaqi.

6. Miyaa Ilaah Ilaah abuuray?
-Maya.
-Ilaah waa baaqi.

7. Miyaa qofi dhalay Ilaah?
-Maya.
-Ilaah waa Baaqi.

8. Miyaa Ilaah Ilaah kale dhalaa?
-Maya.



-Ilaah waa Baaqi.

9. Ma jiraa wakhti ka mid ah wakhtiyadii hore, oo Ilaah aanu noolayn?
-Maya.
-Ilaah waa Baaqi.

10. Miyaa Ilaah is-beddelaa?
-Maya.
-Ilaah isma beddelo.

11. Miyaa Ilaah dhintaa?
-Maya.
-Ilaah ma dhinto.

12. Miyaa Ilaah jidh iyo lafo leeyahay?
-Maya.
-Ilaah waa Ruux.

13. Dadku waxay u baahan yihiin cunno iyo biyo, laakiin maxaa Ilaah u baahan yahay?
-Ilaah waxba uma baahna.

14. Sidee buu Ilaah u nool yahay?
-Ilaah wuxuu ku nool yahay awooddiisa.

15. Aaway Ilaah?
-Ilaah meel waliba ayuu wakhti waliba joogaa.

16. Meeqa Ilaah baa jirtay?
-Waxaa jira hal Ilaah oo keliya.

17. Waa ayo saddexda Shakhsi oo isku halka Ilaah ah?
-Ilaaha Aabbaha ah, Wiilka Ilaah, iyo Ruuxa Qoduuska ah ah.

18. Waa kuma kii uumay samada iyo dhulka?
-Ilaah.

19. Muxuu Ilaah isticmaalay markii uu Samada iyo dhulka uumayey?
-Ilaah waxba ma isticmaalin.
-Ilaah wuxuu Samada iyo dhulka ka abuuray hawo cidla ah.

20. Sidee buu Ilaah wax waliba ku abuuray?
-Hadalkiisa oo keliya ayuu ku abuuray.

21. Sidee buu Ilaah ku awooday inuu Samada iyo dhulka abuuro?
-Ilaah wuu awood badan yahay.
-Awoodda Ilaah ma dhammaato.
-Ma jiraan wax Ilaah aanu samayn karin.

22. Sidee buu Ilaah ku ogaaday sida samada iyo dhulka loo abuurayo?
-Ilaah wax waliba wuu garanayaa.
-Xigmadda Ilaah dhammaad ma leh.
-Ma jiraan wax aanu Ilaah aanu garanaynin.

23. Maxaa Ilaah ka yiri wax kasta ee uu abuuray?
-Ilaah wuxuu leeyahay wax waliba way wanaagsan yihiin.

24. Muxuu Ilaah u awooday inuu wax waliba si kaamil ah u abuuro ama sameeyo?
-Waayo Ilaah waa Kaamil.



25. Yuu Ilaah waxyaabihii uu sameeyey oo dhan u abuuray?
-Dadka.

26. Muxuu Ilaah wax waliba ugu sameyey dadka?
-Waayo Ilaah aad iyo aad buu inoo jecel yahay.

27. Maxaa keenay in Ilaah noqdo kan wax waliba xaq u yeeshay?
-Waayo Ilaah baa wax waliba abuuray oo iska leh.

28. Maxaa keenay in Ilaah xaq u yeesho inaynu innagu addeecno?
-Waayo isagaa ina abuuray, oo ina siiyey nolosha.

29. Halkee bay malaa'igaha oo dhan ka yimaadeen?
-Ilaah baa abuuray dhammaantood.

30. Miyaa Ilaah abuuray malaa'igaha oo uu siiyey jidh iyo lafo?
-Maya.
-Ilaah wuxuu malaa'igaha u abuuray sida ruux, ama wax aan la arki karin oo aan jidh lahayn.

31. Miyaa Ilaah abuuray malaa'igo xun xun, iyo kuwa wanaagsan?
-Maya.
-Ilaah wuxuu malaa'igaha oo dhan u abuuray wanaag.

32. Miyaa Ilaah u abuuray malaa'igaha iyadoo ay ugu wacan tahay inuu u baahnaa caawimaaddooda?
-Maya.
-Ilaah caawimaad cidna ugama baahna.

33. Maxaa haddaba Ilaah u abuuray malaa'igaha?
-Waayo wuu jeclaa iyaga.

34. Bilowgii, halkee bay ku noolaayeen malaa'iguhu?
-Waxay Ilaah kula noolaayeen Samada.

35. Miyaa malaa'igaha ay wakhti waliba meel waliba joogi karaan?
-Maya.
-Ilaah oo keliya ayaa meel waliba wakhti waliba joogi kara.

36. Yaa Ilaah madax uga dhigay malaa'igaha?
-Lucifer ama Shayddaanka.

37. Muxuu maalin Bilowgii ka mid ah, sameeyey Shayddaanku?
-Shayddaanku wuxuu arkay awooddiisa, iyo xigmaddiisa, markaasuu kibray.

38. Muxuu Shayddaanku qorsheeyey inuu sameeyo?
-Shayddaanku wuxuu qorsheeyey inuu jagada Ilaah qaato.

39. Miyaa Ilaah u oggolaaday Shayddaanka inuu jagadiisa qaato?
-Maya.

40. Muxuu Ilaah sameeyey markii uu Shayddaanka u carooday?
-Ilaah wuxuu Shayddaanka ka saaray Samada.

41. Muxuu Ilaah sameeyey markii uu u carooday malaa'igihii raacay Shayddaanka?
-Ilaah wuxuu iyagiina ka saaray ama ka eryey Samada.

42. Muxuu ahaa magacii loo bixiyey cusbaa ee la siiyey Lucifer?
-Wuxuu ahaa Shayddaan.

43. Maxaa magca Shayddaan ka macne yahay?



-Wuxuu ka macne yahay “Cadow.”

44. Waa maxay magaca cusub ee malaa'igihii raacay Shayddaanka?
-Jinniyo.

45. Maxay ahayd ciqaabtii Ilaah u diyaariyey Shayddaanka iyo jinniyadiisa?
-Waxaa lagu tuuray harada dabka ah ee aan weligeed damaynin.

46. Shayddaanka iyo jinniyadiisu yey cadow ku yihiin?
-Waxay cadow ku yihiin Ilaah, iyo hawlaha Ilaah wado.

47. Kaddib markii Ilaah dhulka diyaariyey, yuu abuuray?
-Wuxuu abuuray Aadan oo noqday ninkii ama qofkii ugu horreeyey ee dunida soo dhex istaaga.

48. Sidee baa Ilaah u kala duway dadka iyo xayawaanka markii uu abuuray?
-Ilaah wuxuu dadka ka abuuray araggiisa.

49. Maxay ka macne tahay ama loo fasiranayaa marka la leeyahay Ilaah wuxuu dadka ka abuuray araggiisa?
-Ilaah wuxuu dadka siiyey maskax ay isaga ku gartaan ama ogaadaan.
-Wuxuu kaloo dadka siiyey dareen ay isaga ku jeclaadaan.
-Wuxuu kaloo Ilaah dadka siiyey go'aan ay ku doortaan inay Ilaah addeecaan.

50. Miyaa Ilaah dadka u uumay wangaag, mise xumaan baa loo uumay?
-Ilaah wuxuu dadka u uumay wanaag.

51. Ilaah wuxuu uumay Aadan, Muxuuse madax uga dhigay?
-Ilaah wuxuu aadan madax uga dhigay dhulka iyo wax waliba ee ku dhex jira.

52. Kaddib markii Ilaah uumay Aadan, halkee baa Ilaah geeyey Aadan?
-Ilaah wuxuu Aadan dhex keenay Beer Ceeden.

53. Muxuu ahaa magacii la siiyey geedkii Ilaah ka dhex beeray Beer Ceeden?
-Geedka Nolosha.

54. Muxuu Ilaah Beer Ceeden uga dhex beeray Geedka nolosha Beer Ceeden dhexdeeda?
-Ilaah wuxuu doonayey in Aadan cumo Geedka Nolosha oo uu weligiis Noolaado.

55. Waa maxay magaca geedka mirihiisa Ilaah ka mamnuucay Aadan?
-Waa geedka aqoonta Wanaagga iyo Xumaanta.

56. Haddii Aadan cuno miraha Geedka Wanaagga iyo aqoonta, iyo xumaanta, maxaa ku dhacaya isaga?
-Aadan wuu dhimanayaa.

57. Waa maxay dhimasho?
-Waa kala dhaqaaqis Ilaaha nolosha ina siiya laga dhaqaaqayo.
-Waa kala dhaqaaqista jidhka iyo Nafta.
-Waa geeddi loo gelayo Harada dabka ah ee aan dhammaan.

58. Tuma ayuu Ilaah u abuuray Aadan si ay u caawiso?
-Wuxuu Ilaah aadan u abuuray inay caawiso, Abooto Xaawo.



59. Maxaa Ilaah u abuuray Xaawo?
-Wuxuu u abuuray jacaylkii uu Aadan jeclaa awgii.
-Iyo inaanu doonaynin in Aadan kelidiis ahaado.
-Waxaa kaloo loo abuuray in Ilaah doonayey in Aadan iyo Xaawo ay ubad kala helaan.

60. Bilowgii, markii Aadan iyo Xaawo ay Ilaah la socon jireen sidee bay dareemi jireen?
-Bilowgii, markii Aadan iyo Xaawo la socon jireen Ilaah, aad bay u faraxsanaan jireen.